



**ADEEGYADA SHAQAALEYSIINTA EE  
BUSINESSOULU**



5/2021

## WAA MAXAY TIJAABADA DEGMADU?

Tijaabada degmada ee shaqaaleysiintu waa mashruuc waddanka oo dhan ka jira oo shaqooyinka Xafiiska Shaqada qaar ka mid ah ay u wareegayaan degmada. Ujeedada tijaabada degmadu waa in la fududeeyo in macaamiishu ay galaan seylada shaqada.

Nawaaxigan tijaabada degmada waxaa ku jira Oulu, Kempele, Hailuoto, Ii, Liminka, Lumijoki, Tyrnävä ja Muhos. Degmooyinkan ayaa siinaya adeegyada shaqaaleysiinta dadka degmadooda ka tirsan ee shaqo dalbadeyaal ah.

**Tani macnaheedu waxa weeyaan in Oulu adeegyada ay ka mas'uul yihiin adeega shaqaaleysiinta ee BusinessOulu.**



## MA TAHAY MACMIIL KA TIRSAN ADEEGYADA SHAQAALEYSIINTA EE BUSINESSOULU?

Waxaad tahay qof soo galooti ah ama afkaaga hooyo ma ahan af finnish ama af swidhish.

IYO

Waxaad tahay:

- dalbade shaqo oo shaqo la'aan ah
- qof ku jira koorso xooga shaqada loogu talo galay
- qof ku jira mushaarkeeda la taakuleeyo
- qof ku jira tijaabo shaqo
- qof ku jira waxqabad shaqo ah oo baxnaanin ah
- qof shaqada laga fariisiday muddo ka badan 14 beri

HAA,

waxaad tahay macmiil ka tirsan adeegyada shaqaalaysiinta ee BusinessOulu.

## WAXAAD TAHAY MACMIIL XAFIIKA SHAQADA KA TIRSAN HADDII AD

- shaqeeyso
- qayb ahaan ad shaqeeyso
- guriga ku hayso ilmo
- tahay qof shaqo laga fariisiday muddo ka yar 14 beri

## ARRINKAASI MACNO NOOCE AH AYUU KUU LEEYAHAY ADIGA?

Haddii ad ka tirsantahay kooxda tijaabada degmadu ay ku socoto, Xafiiska Shaqada ayaa kuu hagaya adeegyada shaqaaleysiinta ee BusinessOulu.

BusinessOulu waxaan kuugu diyaarinay adeegyo iyo garabsiin kuu fududeynaya in aad hore ugu socoto hiigsiyadaada shaqo-galidda iyo qarshahaaga.

Waxaad helaysaa tabobare kuu gaar ah oo kugu garabsiinaya dalbashada shaqada iyo hore u wadidda arrimaha.

- Tabobarahaaga waxaad farriin uga soo diri kartaa adeegga internetka ee Oma-asiointi.
- Waxaad ka codsan kartaa ballan ad kula kulanto tabobarahaaga kuu gaarka ah.
- Haddii wakhti lagu qabtay, wakhtiga lagu qabtay goobta kaalay.
- Haddii wakhtiga lagu qabtay anad iman karaynin, soo ogaysii tabobarahaaga gaarka ah.

Waxa kale oo ad ka daneysan kartaa talobixinta taleefanka ee BusinessAsema adiga oo anan ballan qabsanin haddii

- ad rabto in dalabyo ad soo dirsato
- ad u baahantahay talobixin guud si ad garabsiin ugu hesho danahaaga
- ad u baahantahay kombiyuutar ama hagitaan ku saabsan Oma-asiointi.



# ADEEGYADA SHAQAALEYSIINTA EE BUSINESSOULU

Lambarka taleefanka: 08 558 558 10

Adiga oo aanan ballan qabsanin waxaad ka daneysan kartaa

**Talobixinta taleefanke ee BusinessAsema.**

Waxan kuu adeegeynaa isniin – jimce saacadda 9-15.

Cinwaanku waa Hallituskatu 36B.

**SOO DHAWOOW!**





BUSINESS  
ASEMA



VALKEA

HALLITUSKATU

RAUTATIEASEMA

SAARISTONKATU



TE-palvelut  
tjänster | services

UUSIKATU



**OULU** | *BusinessOulu*

**6Aika**



**Vipuvoimaa**  
**EU:lta**  
2014–2020